

QORISTA, SHAQAALEYSIINTA, IYO HINDISAHA DEEGAANSHAHA

Gudiga Waxbarashada ee Rochester waxay aaminsan yihiin in nolosha iyo waayo aragnimada shaqo ee shaqaalaha Dugsiga Degmada Magaalada Rochester ay si weyn u saameeyaan tayada waxbarashada ardaydeeda. Gudiga waxay qiimeeyaan qanimada iyo kala duwanaanta khibradaha sida dhinaca nolosha, shaqada iyo caawinta ee deegaanka magaalooyinka iyo waxay aaminsan yihiin in khibradaha noocan oo kale ah ay kor u qaadaan tayada waxbarashada iyo shaqada ay bixiyaan shaqaalaha Degmada. Sidaas darteed, Gudiga waxay rabaan inay hormariyaan iyo ay dhiirigeliyaan shaqaaleysiinta shaqaale cusub oo khibrad weyn u leh qaybaha magaalada. Sidaan oo kale, Kormeeraha Guud ee Dugsiyada ama qofka loo igmaday waa in oo hirgeliyaa iyo joogteeyaa barnaamijka qorista iyo shaqaaleysiinta tayada sare leh si loo soo jiito, loo sugo iyo loo haysto shaqaale aqoon leh si loo daboolo baahiyaha waxbarasho iyo kuwa kale ee ardayda Magaalada iyo Degmada.

Shaqaaaleysiinta

Degmada waxay raadsan doontaa iyo ay shaqaaleysiin doontaa musharaxiinta ugu aqoonta badan dhamaan jagooyinka banana iyada oo laga shaqaaleysiinaayo meelo kala duwan, oo ay ku jiraan shaqaalaha hada joogo. Shaqaalaha Degmada waxay codsan karaan dhamaan jagooyinka ay ku buuxiyaan shahaadada iyo shuruudaha kale ee lagama maarmaanka u ah inay ka shaqeeyaan Dugsiga Degmada Magaalada Rochester.

Gudiga iyo shaqaalahiisa waa inay u hogaansamaan dhaqanka qorista iyo shaqaaleysiinta shaqaalaha iyada oo loo eegaynin da'da shaqsiga, jinsiyada, caqiidada, midabka, wadanka oo ka soo jeedo, nooca galmoodka, heerka milatariga, jinsiga, naafanimada, sifooyinka dhalashada hide, xaalada guurka, ama guriga, ama heerka dhibanaha rabshadaha qoyska ama xaalad kasto oo kale oo uu ilaaliyo sharciga federaalka ama gobolka.

Shaqo Siinta

Iyada oo la raacaayo dhamaan Adeega Madaniga ah ee lagu dabaqi karo, Sharciga Waxbarashada iyo shuruudaha kale ee sharciga iyo Degmada, Kormeeraha Guud ee Dugsiyada ama qofka loo xilsaaray ayaa siin doono miisaan dheeraad ah iyo tixgelin codsadaayaasha shaqo cusub ee jagooyinkooda ay ku xiran tahay ansixinta Gudiga kuwaas oo ka soo qalinjabiyay dugsiyada dadweynaha ee magaalooyinka ay ku nool yihiin ugu yaraan 110,000 dad oo degane ah ama khibrad weyn u leh la shaqaynta dhalinyarada magaalada ee deegaanka magaalo ka hor taariikhda shaqaalaynta Degmada. Ujeedooyinka siyaasadaan, waayo aragnimada la shaqaynta dhalinyarada magaalada ee deegaanka magaalo waa in lagu qeexaa ugu yaraan labo (2) sano oo ka shaqayn ah ama caawimaad degmo dugsiyeed ama koox aan faa'iido doon ahayn oo qeyb ka ah magaalao oo dadka ku nool ay yihiin ugu yaraan 110,000 oo degane ah. Ujeedooyinka jagooyinka tartanka marka loo eego Sharciga Adeega madaniga ah ee New York, Degmada waa in ay miisaan wayn siisaa musharax kasto oo ka keeno sadexda sare ee imtixaanada adeega madaniga ah ee lagu dabaqi karo kaas oo ka qalinjabiyay dugsi dadweyne oo ku yaalo magaalo ay ku nool yihiin ugu yaraan 110,000 ama haysto shaqada magaalo ama waayo aragnimo caawin ee halkaan lagu sharaxay.

Hindisaha Deganaanshaha Magaalada

Gudiga waxay aqoonsan yihiin faa'iidooyinka Degmada iyo ardaydeeda ay ka helaan shaqaalaha doorto inay degsadaan go'aan waqti dheer ah ee ku noolaashada iyo ku korinta qoysaskooda bulshada Rochester ee ay ka shaqeeyaan. Sidaan oo kale, iyadoo loo eegaayo qoondaynta iyo helitaanka lacagaha sanadlaha ah

ee u go'aamiyo Kormeeraha Guud, Degmada waa inay la shuraakoobaan Magaalada Rochester oo ay ka qaybqaataan Hawlwadeenka Guriyeynta Loo shaqeeyaha Caawinta ("Hindisaha Guriga"). Hindisaha Guriyeynta Magaalada waxa ay siisaa lacagahaas shaqeeyaha loo qoondeeyay sida Degmada ay ula jaanqaado bixinta lacag dhigista Magaalada iyo qarashaadka xiritaanka guryaha ee lagu bixiyo suuqa gaarka ah ee ku yaalo gudaha Magaalada Rochester.

Iyada oo la raacaayo shaqaalaha Degmada oo la buuxinaayo dhamaan shuruudaha Hindisaha Guriyeynta Magaalada, helitaanka lacagaha Degmada, iyo xeerarka iyo nidaamyada oo dejiyay Kormeeraha Guud, Degmada waxay bixin kartaa hal mar, sadex kun oo doolar (\$3,000) faa'iido shaqaale cayiman kuwaas oo ka iibsado degaankooda koowaad Magaalada Rochester iyo ku nool guriga ugu yaraan shan sano.

Hindisaha Guriyeynta Magaalada waxa ay bixisaa in Magaalada ay la mid noqoto manfaca Degmada markii ugu horayso ee iibsashada guryaha Magaalada lacag dhan ilaa sadex kun oo doolar (\$3,000). Waxaa jiro nidaam codsi gaar ah oo loogu talagalay manfacyada Magaalada Rochester. Dheefaha Magaalada iyo Degmada waa inay ahaato mid la heli karo lacag dhigista oo keliya iyo qarashyada xiritaanka iibka noocaas ah.

Intaas waxaa dheer, iyadoo la raacaayo helitaanka lacagaha Degmada iyo qawaaniinta iyo nidaamyada oo dejiyay Kormeeraha Guud, Degmada waxay bixin kartaa hal mar sadex kun oo doolar (\$3,000) faa'iido tiro cayiman oo shaqaale Degmo ah oo leh ama hore u lahaan jiray guri ku yaalo Magaalada Rochester iyo iibsan doonaan guri cusub oo magaalada ah halkaas oo ay ku noolaan doonaan sida degenaansho ahaan ugu yaraan shan sano. Dheefaha Degmada waa inay ahaato mid lagu heli karo oo kaliya lacag dhigista iyo qarashka xiritaanka iibka noocaas ah iyo lagana yaabo in aan lagu xirin lacagaha la isku waafajiyo iyada oo loo marayo Hindisaha Guriyeynta Magaalada iyo malala barbardhigi karo lacagta Hindisaha Guriyeynta Magaalada.

Kormeeraha Guud waa inoo hirgeliyaa xeerar iyo habraac lagu dhaqangelinayo siyaasadaan.

Tixraac aan Shaqaalaysiinta, Shaqo Siinta iyo Hindisaha Deganaanshaha (9240-R)
toos aheyn:

Tixraac: Takoorka Da'da ee Sharciga Shaqada (ADEA), 29 USC §§ 621 iyo seq. (Mamnuucida takoorka ku salaysan da'da)
Sharciga Ameerikaanka leh Naafanimada (ADA), 42 USC §§ 12101 et seq. (Mamnuucida takoorka ku salaysan naafanimada)
Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 (Title VII), 42 USC §§ 2000e et seq. (Mamnuucida takoorka ku salaysan midabka, asalka qaran, jinsiyada, diinta iyo jinsiga)
Sharciga Dhaqan celinta ee 1973 (Qaybta 504), 29 USC § 794 (mamnuucida takoorka ku salaysan naafanimada)
Ciwaanka IX, 20 USC §§ 1681 *et seq.* (Mamnuucida takoorka ku salaysan jinsiga)
Dastuurka Gobolka New York, qodobka V, § 6 (oo u baahan in shaqaalaha dawlada loo magacaabo iyadoo lagu salaynaayo mudnaan iyo taam ahaansho)
Sharciga Shaqaalaha Rayidka §§ 22, 40-44, 61 (1) (xeerarka jagooyinka la kala saaray)
Sharciga waxbarashada §§ 1604 (8), 1709 (16), 2503 (3), 2554 (2), 3012 (1) a) (Maamulka gudiga si uu u shaqaaleysiyo shaqaalaha)
Sharciga Waxbarashada §§ 1604(39), 1709(39), 1804(9), 1950(4), 2503(18), 2554(25) (shuruudaha fara ka qaadista)
Sharciga Fulinta §§ 290 *et seq.* (Mamnuucida takoorka ku salaysan da'da, midabka, caqiidada, naafanimada, xaalada guurka, asal qaran, jinsiyad ama jinsi) 8 NYCRR § 80-5.5 (§211 habraaca dhaafitaanka).

Xasuus qoraal: La qaatay Agoosto 23, 2012 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2012-13: 103; Wax laga bedelay Abriil 27, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 627

ct/sg